Dhaqaalaha Ontario Dhinaca ayuu Rogayaa, Shaqooyin ayuu Abuurayaa

Dowladda McGuinty waxay Yareyneysaa Hoos u Dhaca Dhaqaalaha Iyadoo Isla Markaana Ilaalineysa Iskuullada iyo Isbitaallada

War Maarso 29, 2011

Miisaaniyadda Ontario ee 2011 waxay sii waddaa taageerada dowladda McGuinty ee soo kabashada dhaqaalaha Ontario. Miisaaniyaddu waxay dib u soo cusbooneysiineysaa abbaarsiga baabi'inta hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo isla markaana ilaalineysa waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka.

Hoos u dhaca dhaqaalaha ee 2010-11 waxaa lagu qiyaasay in uu noqdo $16.7 bilyan — $3 bilyan mid ka hooseeya saadaalintii sanad ka hor. Tan waxaa in badan sabab u ahaa xaqiiqada ah in kharashka barnaamijyada ee loogu talogalay 2010-11 lagu qiyaasay in uu noqdo $2.6 bilyan mid ka hooseeya saadaalintii lagu daabacay Miisaaniyaddii 2010.

Maalgelinta istaraatiijiyadeed ee Miisaaniyadda 2011 waxaa ku jira:

Shaqooyinka iyo Koboca Dhaqaalaha

- Wadaag cusub oo lala yeesho qaybaha gaarka loo leeyahay wuxuu Ontario ka abuuri doonaa isla markaana hanan doonaa 10,000 oo shaqo
- Ku caawinta kuwa dhaqda lo'da, doofaarka, adhiga iyo weylaha meel marinta Barnaamij Maareyn Halis cusub, iyo Barnaamij Maareyn Halis oo qofku Iskii u Jiheeyo oo loogu talogalay qaybta khudradda la cuni karo

Ilaalinta Waxbarashada

- In ka badan 60,000 oo boosas arday cusub ayaa laga heli doonaa kulliyadaha iyo jaamacadaha Ontario marka la gaaro 2015-16. Arday kasta oo Ontario ku nool oo u qalma meel ayuu ka heli doonaa.
- Bisha Sebtembar ee soo socota, iskuul xannaano carruur oo maalintii oo dhan ah ayaa laga heli doonaa 200 iskuul oo dheeraad ah, kaasoo u faa'iideynaya ilaa iyo 50,000 oo carruur ah. Xilligaan la joogo, ku dhowaad 600 iskuul ayaa bixiya xannaano maalintii oo dhan ah oo loogu talogalay ilaa iyo 35,000 carruur ah. Si buuxda ayaa loo meel marin doonaa, iyadoo laga helayo iskuul kasta, marka ay tahay Sebtembar 2014.

Ilaalinta Daryeelka Caafimaadka

- Qiyaastii 90,000 baaritaanno kansar naasood oo dheeraad ah ayaa la sameyn doonaa si gacan looga geysto in la gaarsiiyo haween badan oo halis sare ugu jira
- Istaraatiijiyad Caafimaad Maskaxeed iyo Qabatin Maandooriye oo baaxad weyn, iyadoo laga billaabayo carruurta iyo dhallinyarada

…/2

- Ballaarinta adeegyada farmashiyeyaasha iyo taageero loogu talogalay dadka hela Barnaamijka Manfaca Daawada Ontario – iyadoo lagu caawinayo waayeelka iyo kuwa kale ee ay haystaan arrimaha sida kala talin raadraaca daawo loo qoray

Si Mas'uuliyad leh wax u Maareyn

Si gacan looga geysto baabi'inta hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo aan halis la gelin koboca dhaqaalaha ama horukaca dadka reer Ontario ay ka sameeyeen dhinaca waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka, ayey dowladda waajib ku tahay in ay mar kale dib u qaabeyso sida ay hawsha u qabato. Hindiseyaashii in dhawaale iyo kuwa looga dhawaaqay miisaaniyaddaanba waxay gacan ka geysan doonaan xaqiijinta kaydsashada ku dhowaad $1.5 bilyan saddexda sanadood ee soo socota. Waxaa jira tallaabooyin dhowr ah oo kala geddisan oo cusub oo adeegyada dadweynaha ka dhigi lahaa kuwo in badan la xammili karayo isla markaana waafi u ah qoysaska Ontario, kuwaasoo ay ka mid yihiin:

- Go'aan ka gaaridda in habka gaarsiinta Adeegga Ontario ee xilligan jira uu dadka siiyo qiimaha iyo adeegga ugu wanaagsan
- U sharrixidda hay'adaha waaweyn in ay la yimaadaan kayd lacageed oo dhan $200 malyuun marka la gaaro 2013-14
- Si joogto ah boqolkiiba 10 hoos ugu dhigidda maalgelinta xafiisyada fulinta ee hela lacagaha sida gaarka ah loogu xawilo muddo labo sano ah. Sharcigaan waxaa sidoo kale lagu dabbaqi doonaa hay'adaha dowladda ee waaweyn
- Hoos ugu sii dhigidda cabbirka Adeegga Dadweynaha Ontario (OPS) ilaa 1,500 boos oo dheeraad ah inta u dhexeysa Abriil 2012 iyo Maarso 2014. Tani waxay dheeraad ku tahay hoos u dhigiddii 3,400 shaqaale OPS ee waqti buuxa ee lagu dhawaaqay Miisaaniyaddii 2009
- Ka dhigidda habka xabsiyada mid aad casri u ah oo waafi ah. Wanaagga waxaa lagu gaari doonaa iyadoo la xirayo xabsiyada aan sida buuxda loo isticmaalin ee ku yaalla Owen Sound, Walkerton iyo Sarnia, iyo iyadoo qayb ahaan la xirayo Xarunta Xabsiga Galbeedka Toronto. Maxaabiista waxaa loo wareejin doonaa xabsiyo ka fiican oo cusub, oo kana ballaaran
- Ka noqoshada dhisidda aqalka Maxkamadda Galbeedka Toronto, taasoo keeneysa kaydsashada $ 181 malyuun saddexda sanadood ee soo socota
- Aasaasidda Guddiga Dib u Qaabeynta Adeegyada Dadweynaha Ontario, ee uu madaxda ka yahay dhaqaale yahanka la ixtiraamo ee Don Drummond, kaasoo talo ka bixin doona dib u qaabeynada gacanta ka geysanaya dardar gelinta qorshaha dowladda ee lagu baabi'inayo hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo isla markaana la ilaalinayo waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka.

Miisaaniyadda 2011 waxay ku dhisan tahay Open Ontario Plan ee dowladda McGuinty si loo xoojiyo dhaqaalaha, kor loogu qaado shaqo abuuridda loona ilaaliyo adeegyada dadweynaha ee muhiimka ah.

ODHAAHYO

"Labo sanadood ka dib hoos u dhicii dhaqaalaha ee adduunka ugu xumaa ee inteenna badan abid na soo mara, ayuu dhaqaalaha Ontario dhinaca rogayaa oo shaqooyinkii way soo noqonayaan. Xoog shaqaale caafimaad qaba oo si wanaagsan wax loo baray wuxuu xoojinayaa dhaqaalaha Ontario wuxuuna soo jiidanayaa maalgashi iyo shaqooyin."
— Dwight Duncan, Wasiirka Maaliyadda

…/3

“Waxaan haynaa qorshe mas’uuliyad leh oo lagu baabi’inayo hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo la ilaalinayo iskuullada, isbitaallada iyo koboca dhaqaalahaba. Tani waxay u baahan tahay dib u qaabeyn dheeraad ah ee sida dowladdu ay u shaqeyso si loo xaqiijiyo in lacagta si wanaagsan loo isticmaalay. Kaa beddelkiisa – oo ah barnaamij hay’adaha oo dhan wax looga jarayo – wuxuu dhinaca kale u duwayaa horukaca la taaban karo ee dadka reer Ontario ay guusha uga gaareen daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada, wuxuuna manjo xaabinayaa tayo lahaanta dhaqaalaha gobolka.”
— Dwight Duncan, Wasiirka Maaliyadda

WAX BADAN BARO

Akhri Miisaaniyadda Ontario ee 2011.

Akhri gundhigga warka ku saabsan Miisaaniyadda Ontario ee 2011:
- Muuqaalka Guud iyo Qorshe Maaliyadeedka Dhaqaalaha Ontario
- Si Mas’uuliyad leh wax u Maareyn
- Waxbarasho iyo Daryeel Caafimaad oo Xooggan waxay Taageerayaan Dhaqaale Xooggan

Akhri wararka cusub ee Miisaaniyadda Ontario ee 2011:
- U Rogidda Dhinac Mustaqbal Wacan
- Caafimaadka Maskaxda Carruurta
- Caawinta Beeraleyda Ontario

Wax badan ka baro Qorshaha Furan ee dowladda Ontario.

-30-

WAXAA LOOGU TALOGALAY OO KELIYA XOGWEYDIINNADA SAXAAFADDA:
Andrew Chornenky, Xafiiska Wasiirka, 416-325-9819
Scott Blodgett, Wasaaradda Maaliyadda, 416-325-0324

Xogweydiinnada dadweynaha soo wac 1-800-337-7222
(Telefoonkaan wuxuu bilaash ka dhex yahay Ontario oo keliya)